# Baaritaanka qaaxada ama tiibiishada ee hooyada uurka leh

## Waa maxay sababta haweenka uurka leh looga baaro qaaxada?

Xilliga uurka, difaaca jirka ee hooyada waa uu yaraadaa si jirku uusan u diidin ilmaha uurka ku koraaya. Hooyooyinka qaba qaaxada, khatarta ah in cudurku uu isu beddelo mid firfircoon ayaa kordhaysa xilliga uurka iyo dhalmada kaddib. Qaaxadu waxaa ay sii daciifisaa xaaladda caafimaad ee hooyada hadba inta uu cudurku sii fido ama ka sii daro.

Qaaxada ku dhacda hooyada xilliga ay uurka leedahay, waxaa ay keeni kartaa halista ah dhalitaanka wakhtigiisa ka soo hormara, miisaanka oo hoos u dhaca xilliga dhalmada iyo in ilmaha yar ee markaa dhashay uu dhinto. Ilmaha uurka ku jiraa wuxuu cudurka qaadi karaa inta uu uurka ku jiro ama islamarka uu dhasho kaddib, cudurku wuxuu halis gelin karaa nafta Ilmaha dhallaanka ah.

Hooyada qaaxada ama tiibishada qabtaa iyadoo aan ogeyn ayay cudurka u gudbin kartaa xubnaha qoyskeeda iyo dadka kale ee ay asxaabta yihiin, sida dadka ay kula kulanto rugta daryeelka caafimaadka dhallaanka iyo hooyada (neuvola) ama isbitaalka. Sababahan awgood, waxaa muhiim ah in xanuunka qaaxada ee hooyada wakhti hore la ogaado, islamarkaana loo bilaabo daaweynta. Baaritaannada lagu ogaado cudurka qaaxada waxaa ay gacan ka geystaan ilaalinta caafimaadka hooyada, ilmaha dhalanaaya iyo dadka ay asxaabta yihiin hooyada.

## Yaa baaritaanka lagu samaynayaa, maxaa la baarayaa, goorma ayaase la baarayaa?

Baaritaannada waxaa lagu samaynayaa dadka mar noloshooda ka mid ah ay soo martay khatarta ah in uu ku dhaco cudurka qaaxada ama tiibishada. Dhammaan hooyooyinka uurka leh ee ka tirsan kooxaha u nugul halista cudurrada waxaa la weydiin doonaa su'aalo ku saabsan astaamaha cudurka, sidoo kale waxaa laga qaadi doonaa sawir ama raajitada sambabada. Weydiimaha ama su'aalaha ku saabsan astaamaha cudurka waxaa looga qaadi doonaa rugta daryeelka caafimaadka dhallaanka iyo hooyada (neuvola) xilliga bilowga uurka, sidoo kalena waxaa lagu weydiin doonaa xarunta qaabilaadda dhalliinka. Raajitada ama sawirka sambabada waxaa la qaadi doonaa 4-6 toddobaad ka hor dhalitaanka. Rugta daryeelka caafimaadka dhallaanka ayaa laga sameynayaa warqadda gudbinta ama u dirista dhakhtarka (neuvola), waxaana lagu siinayaa hagista iyo tilmaanbixinta la xiriirta sawirka raajada.

Falcelinta difaaca ee xubnaha jirka ee hooyada hoos ayuu u dhacaa, waxaana kordha khatarta ah xanuunka qaaxada inta lagu guda jiro xillli kasta oo ka mid ah wakhtiga uurka. Sidaas darteed, sawirka raajada sambabada ayaa la sameeyaa xilli kasta oo ka mid ah wakhtiyda ay hooyadu uurka leedahay.

## Waad ku jirtaa kooxda u nugul halista cudurrada haddii:

- aad ku dhalatay ama ku soo noolayd dal ka mid ah dalalka uu cudurka qaaxadu ku badan yahay
- aad Finland timid adiga oo qaxooti ah ama magangalyoddoon ah
- markii aad Finland imaanaysay aad ka timid xero qaxooti ama dhul dagaal ka jiro

- dadka asxaabtaada ah ama kuwa kale ee kaa agdhow ay qabeen qaaxada, ama adiga laftigaaga aad la xanuunsatay ama ay kugu dhacday qaaxada.
- Waxaad shaqadaada ku daryeeshay ama ku daawaysay bukaanno qaba xanuunka qaaxada

## Anigu ma lihi wax astaamo ah, maxaa sababay in la iga qaado raajitada sambabada?

Waxaa dhici karta in sambabada laga helo cudurka qaaxada, xataa haaddii uusan qofku lahayn wax ka mid ah astaamaha cudurka. Cudurka waxaa lagu ogaan karaa iyada oo la adeegsanaayo raajitada sambabada. Haddii la ogaan waayo hooyada oo ay suurtaggal tahay in ay qabto cudurka qaaxada, arrinkaas wuxuu keeni karaa in la ogaan waayo qaadista ilmaha uurka ku jiraa uu qaado cudurka, waxaana dhici karta in ilmuhu uu si aad u daran u xanuunsado. Sababtaas awgeed ayaa raajitada sambabada looga qaadaa haweenka dhalaaya ee aan lahayn astaamaha cudurka ee ka tirsan kooxda u nugul halista cudurrada.

## Raajitada wax khatar ah uma keeneyso uurjiifka

Qiyaasta shucaaca ee ay hooyadu ka heleyso raajada dijitaalka ah ee sambabada waa mid aad u yar. Waxaa ay la mid tahay heerka shucaaca dabiiciga ah ee deegaanka ee dadka oo dhan ay helaan, xitaa carruurtu ay ku jirto, waa muddo qiyaastii le’eg siddeed maalmood. Ilmaha uurjiifka ah kuma jiro goobta sawirka laga qaadayo, sidaas darteed raajadu wax khatar ah uma gaysanayso ilmaha uurka ku jira.

## Waa maxay cudurka qaaxada ama tiibishada?

Qaaxada ama tiibishida waa xanuun ay keento bakteeriyada taasoo inta badan ku dhacda sambabada qofka, laakiin sidoo kale waxaa laga heli karaa jirka qaybihiisa kale. Marka qofka cudurka qabaa uu hadlaayo ama qufacaayo, hawada waxaa ku faafaaya bakteeriyada. Qaaxada waxaa lagu kala qaadaa hawada la neefsanaayo. Qofkuna wuxuu u nuglaan karaa oo cudurka qaadi karaa, isaga oo aan ogayn.

Qaaxada ama tiibishadu waa cudur aad ugu badan dunida. Sannad kasta waxaa qaada in ka badan 10 milyan oo qof, halka 1.3 milyan oo qofna ay u dhintaan. Qiyaastii afar meeloodow meel dadka dunida ah ayaa qaaday cudurka qaaxada. In badan oo dadka ka mid ah, bakteeriyada qaaxadu waxaa ay ku sii jirtaa jirka iyada oo aan firfircooneyn (oo ah infekshan qarsoon ama hurda).

Xataa haddii qofku uu qaaday cudurka isagoo carruur ah, bakteeriyadu waxay firfircooni yeelan kartaa oo qofku uu la xanuunsan karaa markasta oo xilliga noloshiisa ka mid ah. Difaaca jirka (falcelinta difaaca jirka / immuunivaste) oo daciifa waxaa ay kordhisaa halista cudurka. Uurka waa xaalad tusaale u ah arrinkaas ah in difaaca jirku daciifo. Carruurta yaryar, gaar ahaan dhallaanka cusub, waxaa ay sidoo kale halis weyn ugu jiraan qaadista cudurka.

Finland xanuunkaas waxaa uu ku dhacaa in ka yar 200 oo qof sannadkiiba, qiyaastii in ka badan kala bar dadka xanuunkaas uu ku dhacay waa dadka waddanka u soo guuray ee ajaanibta ah. Xanuunkaas waxaa looga bogsadaa daawo loo qaato, qofka Finland joogana baaritaannada iyo daryeelka xanuunku waa u lacag la’aan ama bilaash.

## Waa maxay astaamaha cudurka tiibishada?

Astaamaha ugu caansan ee cudurka tiibishada waxaa ka mid ah qufac socda wax ka badan saddex toddobaad, iyo xaako (taasoo ah xab ka soo go'aysa sambabada). Xaakada dhexdeeda waxaa laga yaabaa in uu ku jiro dhiig. Qofka xanuunsanaaya waxaa macquul ah in ay qandho ama xummad qabato, in uu caatoobo iyo in uu habeenkii dhidido. Xaaladda guud ee qofka iyo rabitaanka cuntada ayaa laga yaabaa in ay daciifaan. Hooyada uurka leh astaamaha qaaxada ee ay isku arkaysaa waxaa macquul ah in ay noqdaan kuwo yar ama kuwo la mid ah astaamahii caadiga ahaa ee ay dareemaysay xilligii uurka. Sababtaas darteed ayay muhiim u tahay in aad u sheegto waxyaabaha aad dareemayso oo dhan kalkaalisada caafimaadka ama dhakhtarka.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qaaxada oo ku qoran luqado kala duwan ayaad ka heleysaa bogga internetka ee cinwaankiisu yahay tuberkuloosi.fi.